



BAAQ CAMBAAREYN AH OO LOO DIRAYO AXMED MADOOBE IYO MALEESHIYADIISA KISMAAYO.

Ku: Dawladda Federaalka Soomaaliya

Ku: Urur goboleedka Igad

Ku: Ciidamada Amisom

Ku: United Nations Human Rights Council (UNHCR)

Ku: Beesha Caalamka

Ururka Midnimada Dirdeed (UMD) oo ah urur ay ku mideysanyihiin Ugaasyo, Salaadiin, Cuqaal, Aqoonyahan, Siyaasiyiin iyo Waxgarad farabadan oo ku kala sugan dalka gudahiisa iyo dunida dacalladeeda, wuxu si adag u cambaareynayaa dhaqanxumada iyo gaboodfallada isugu jira Dil, Dhac, Xadhig iyo Barakicin ay Axmed Madoobe iyo maleeshiyadiisu ka wadaan degaannada Jubbada Hoose, gaar ahaan magaalada Kismaayo iyo nawaaxigeeda.

Waxa horay u dhacay dilal qorsheysan oo ay maleeshiyaadka Axmed Madoobe ugu geysteen Salaadiin iyo Cuqaal. Waxa xigtay in xadhig iyo afduub ay la beegsadaan beel gaar ah (Biimaal) oo ilaa maanta aan la garaneyn halka iyo xaaladda ay ku sugan yihiin dadkii ay qafaasheen oo isugu jira Cuqaal, Saraakiil Sarsare, Haween tirobadan iyo Waayeel.

Tacaddiyada uu Axmed Madoobe ka wado Kismaayo ma aha kuwo lagu sii daawan karo. Waa in tallaabo sharciga waafaqsan degdeg looga qaado oo la horkeeno maxkamadaha ku shaqada leh, haddii ay yihiin kuwa dalka ama kuwa caalamiga ee masuulka ka ah xadgudubyada iyo tacaddiyada loo geysanayo xuquuqda aadanaha.

06.10.2019

Guddoomiyaha UMD

Ibrahim Ali Aden